

Astaamaha Mashruuca

Dhulka ugu weyn ee ay leeyihiin muslimiinta gudaha Sweden.

Maalgelinta ugu weyn waxay ka timid dadka dagaan Sweden iyo nawaaxigeeda.

Isku filnaansho iyo madax-bannaani

%66 mashruuca ayaa horay loo dhammeystiray labadii sano ee la soo dhaafay - 2023-2021.



Si aad uga qayb qaadato

Nala wadaag ducada, erayadaada wanaagsan, dadaalkaaga iyo lacagtaada.

Xubin aasaase: 24 000 SEK

Mitir laba jibbaaran (1m2): 5 000 SEK

ka qayb qaado dhismaaha: 1 000 SEK



123 319 54 50



donation.helsingborgsmoske.se

Waxaan si buuxda ugu kalsoonahay in Allah na garab gali doono si an uu dhamestirno mashruucan, waxaan jeclaan lahen in ad nagala qeb qadato, ugargar walalahaga gargaarka ubahan.

Mahadsanid.

Macluumaadka xiriirka

Mahmoud Kawaach

+46 70 710 70 35

Walid Hams

+46 70 467 52 34

Jamil Doudar

+46 73 699 95 99

kontakt@helsingborgsmoske.se
Grusvägen 15, 254 64 Helsingborg



@helsingborgsmoske



Wakfka Masaajidka Helsingborg

Marka ey riyadu romowdo



Magaalada Helsingborg

Helsingborg waxa ay ku taalaa xeebta galbeed ee qaybta koonfureed ee Sweden oo ay ku noolyihiin 140 kun oo qof, 14 kun oo ka mid ah waxay aaminsan yihiin diinta Islaamka. Tirada Muslimiinta ku nool Helsingborg ayaa si joogto ah u kordhaysa iyadoo tirada xarumaha Islaamiga ah ee jira ay yaryihiin. Sidaas darteed, dadaallo aad u weyn ayaa la geliyay dhismaha Xarun Islaami ah (Wakf) oo matalaysa diinta Islaamka isla markaana daboolaysa baahiyaha ruuxiga ah iyo himilooyinka dadka Muslimiinta ah ee ku nool Helsingborg.

ururka mas'uulka ka ah mashruucan

Waa urur aan faa'iido doon ahayn oo yar oo ka diiwaangashan magaalada Helsingborg tan iyo 1994. Wakfka Masaajidka Helsingborg waa ururka Islaamiga ah ee ugu weyn magaalada oo leh in ka badan laba kun oo xubnood. Ururka ayaa dhisay sumcad aad u sareysa iyo xiriirro adag oo la leh xisbiyada siyaasadeed kala duwan, hay'adaha maamulka magaalada, iyo xarumaha Islaamiga ah ee kale ee Helsingborg iyo guud ahaan Sweden.

Marxaladda hore ee mashruucan waxaa laga bilawey in lala sameeyo xiriir hay'adaha iyo xisbiyada siyaasadeed ee Sweden si loo helo oggolaansho dhismaha Wakfka. Iskuday badan kadib waxa lagu guleystey in oggolaansho loo helo iibsashada dhul baaxadiisu tahay 10,000 m2 si loogu isticmaalo dhismaha xarun Islaami ah oo baaxaddeedu tahay 3600 m2. Fursadani waxay matashaa riyo socotay muddo dheer oo ay lahaayeen Muslimiinta dhan ee Helsingborg iyo nawaaxigeeda. Kadib, qorshe dhammaystiran ayaa la diyaariyay si loo hirgaaliyo mashruucan.


Xarunta Ganacsiga

Ka kooban laba dabaq oo wadarta guud tahay 1600m2 iyo qiimo gaaraya 18 milyan SEK. Xaruntan hadda waxaa loo isticmaalaa masajid iyo caruurta mel wax lagu baro.

Xaaladda uu marayo: **wala Dhameystirey.**

Marxaladaha Mashruuca

Qiyaastii 66% mashruuca oo dhan ayaa la dhammaystiray. Wakfka ayaa la furay waxaana loo isticmaalayaa dhammaan salaadaha iyo hawlaha diimeed, bulsho, iyo dhalinyarada kala duwan.



Marxaladda 1

libsiga dhulka iyo helitaanka dhammaan oggolaanshaha loo baahan yahay, qorshayaasha naqshadeynta, iyo diyaarinta kaabayaasha dhaqaalaha.
La dhammeystiray; bilowgii 2023.

Marxaladda 2

Dhismaha xarunta ganacsiga iyo diyaarinta dabaqa hoose sida hoolka salaadda ku meel gaarka ah iyo dabaqa labaad sida iskuulka barashada Qur'aanka iyo luqadda Carabiga iyo sidoo kale bixinta meel xafiisyo wadaag ah oo la kireysto.
La dhammeystiray; bilowgii 2024.

Marxaladda 3

Dhismaha Dhismaha Masaajidka iyo dhammaystirka mashruuca oo dhan.
La filayaa Dhammaystirka; dhamaadka 2025

Dhulka iyo Kaabayaasha

dhul baaxaddiisu tahay 10 000m2 ayaa la iibsaday oo loo diyaariyey dhismaha, qiimaha kubaxay aya gaaraya 8 milyan SEK.
Xaaladda uu marayo: **wala Dhameystirey.**

Muhiimadda Mashruuca

Korodhka degdegga ah ee Muslimiinta ee magaalada. Korodhka tirada dadka waxaa sabab u ah dhowr arrimood oo ay ka mid yihiin muhaajiriinta cusub, jilalka labaad iyo saddexaad ee Muslimiinta, iyo Muslimiinta cusub ee qaata diinta Islaamka.

Baahida loo qabo xarun si sax ah u matalaysa diinta Islaamka oo awood u yeelan karta inay ka faa'iideysato tamarta dhalinyarada Muslimiinta ah. La'aanta xarumaha noocan oo kale ah waxay keeni kartaa in si qaldan loo meeleeyo tamarta dhalinyarada taasoo keeni karta inay galaan nolol si xun u saameyn karta iyaga iyo bulshada ay la nool yihiin.

Masraxa siyaasadeed ee Sweden ayaa si tartiib ah ugu dhaqaaqaya dhinaca midigta fog taasoo khatar gelinaysa jiritaanka iyo wanaagga bulshada Muslimiinta ah ee Sweden. Sidaas darteed, lahaanshaha dhismayaasha aan isticmaalno ayaa laga yaabaa inay xaqiijiso meel jilalka mustaqbalka ay ku dhaqan geli karaan diintooda.

Qiimaha Mashruuca

Mashruuca waxaa lagu qiyaasay inuu ku kici doono lacag ahaan 65 milyan oo Krona Iswiidhish ah. Ilaa hada, waxaa la soo uruuriyey 42 milyan Krona Iswiidhish ah gudaha Sweden iyo nawaaxigeeda.

Dhismaha Masjidka

Masjidka baaxaddiisu waxu noqon doona 1920m2, waxa uu qaadi karaa 1400 oo qof ah rag iyo dumar isku jiran. Qiimaha lagu qiyaasay waa 32 milyan SEK.

Xaaladda uu marayo: **Dhismaha ayaa socda.**

